



# Farshaxanka iyo Booska

Farshaxanku wuxuu kugu martiqaadayaa in aad si degan u fahanto goobtan adigoo isticmaalaya dareemayaashaada oo dhan. Gather, oo ah taalada halkan ka taagan, wuxuu maamuusayaa sheekooyinka isku dhafan ee ku saabsan soo celinta bilicda degaanka oo dadweynaha oo dhan u furan.

Farshaxan-yaqaan Kristin Tollefson waxay fikrado badan ay isaga keentay sanadihii badnaa ee ay la shaqeynaysay qaybaha bulshada, hay'adaha degaanka, wakiillada shirkadaha iyo shaqaalaha naqshadaynta mashruuca. Farshaxan-yaqaanno, dhallinyaro iyo shirkado reer South Park iyo Georgetown, oo webiga dhankiisa kale ah, ayaa gacan ka geystay dhismaha. Waxay ka samaysan tahay bir la shubay, aluminum iyo dhalooyin dib loo isticmaalay, kuul xabag leh, cabbirka jooguna yahay 25 feet.

Farsahaxan kale ayaa ku xardhan beertan. Inta aad goobta maraysid raadi kuraas alwaax ah oo samayskooda lala kaashaday farshaxan-yaqaan Dan Webb, goobta baaskiilka la dhigto iyo muuqaallo tusaya dadka dhulka u dhasay dhirtooda iyo hidahooda.